# Dib-u-milicsiga Xiriirka Soomaaliya iyo Turkiga

20 Ogoosto 2021



Bishan waxay ku beegan tahay sannad-guuradii 10-aad ee xiriirka Soomaaliya iyo Turkiga. Xarunta Aaran waxay dib u eegis ku sameysay xiriirka Turkiga iyo Soomaaliya iyo saamaynta istiraatiijiyadda 'soft power' ee Turkida.

---

Cilaaqaaadka Turkiga iyo Soomaaliya wuxuu ka dhigan yahay mid guulo waaweyn laga gaaray marka loo fiiriyo siyaasadda guud ee Turkiga ee ku aadan qaarada Afrika ee loo yaqaan "Open to Africa" taasoo soo ifbaxday sanadkii 2005 ujeeddadiisuna tahay sidii kor loogu qaadi lahaa saameynta diblomaasiyadeed iyo ganacsi Turkiga ee qaaradda Afrika oo dhan. Siyaasadda Turkiga ee Soomaaliya waxay ku xiran tahay siyaasadda guud ee Turkiga ee Afrika. Sannadkii 2011-kii wuxuu ahaa sanadkii xiriirka Turkiga iyo Soomaaliya bog cusub u furmay ka dib markii Madaxweyne Erdogan oo markaas ahaa Ra'iisul Wasaaraha Turkiga uu markii ugu horreysay booqday Muqdisho iyadoo ay Soomaaliya markaas ka jirtay macluul ba'an, waana hoggaamiyihii ugu horreeyay ee aan Afrikaan ahayn oo booqda caasimadda dagaalladii sokeeye ka dib.

Gargaarkii bani'aadamnimada ee 2011 bilawday ayaa waxaa xigay dadaal diplomaasiyadeed iyo ganacsi kaasoo qeyb ka ah tartkanka Turkiga kula jiro quwadaha kale. Turkigu wuxuu kasbaday quluubta iyo maanka muwaadiniinta Soomaaliyeed meel walba oo ay dunida ka joogaan wuxuuna si taxaddar leh u farsameeyay kuna guulaystay inuu dhiso is-aaminaad u dhexeeya Soomaalida iyo Turkida. Saameynta Turkiga ee Soomaaliya waxaa astaan u ah

mashaariicdiisa oo aad u muuqda iyo gargaarka degdegga ah ee ay sida tooska ah u gaarsiiyaan deegaanada.

Diblumaasiyad ahaan Turkiga wax xiriir ah lama lahayn Soomaaliya ka hor booqashadii Madaxweyne Sheekh Shariif sanadkii 2009 ku tegay Turkey. Sannadkii 2012kii Turkigu wuxuu marti galiyay shirkii Soomaaliya ee Istanbul oo diiradda lagu saaray mustaqbalka Soomaaliya wuxuuna isu keenay in ka badan 300 ergo oo ka kala socday ururrada bulshada rayidka ah, siyaasiyiin, aqoon yahano, haween iyo oday dhaqameedyo. Sannadkii 2016kii Turkiga wuxuu Muqdisho ka furtay safaaradda ugu weyn ee Turkiga. Dhowaan Turkigu waxay markii ugu horeeysay ergey gaar ah u magacaabeen Soomaaliya si loo dardar geliyo wadahadalada Somaliland. Turkiga ayaa sidoo kale u fududeeyey fiisooyinkii dal ku galka 17 dal oo Afrikaan ah oo ay Soomaaliya ku jirto.



Sannadkii 2011, Turkigu wuxuu Soomaaliya ugu deeqay in ka badan $400 milyan gargaarka bani'aadamnimo. Sannadkii 2013kii horumarinta iyo gargaarka bani’aadamnimo ee Turkigu siiyo Soomaaliya wuxuu gaaray 370 milyan oo doollar. Caddadka gargaarka bani’aadamnimo iyo horumarineed ee la siiyay Soomaaliya ilaa maanta ayaa kor u dhaaftay US $ 1 bilyan.

Laga soo bilaabo 2011, saraakiisha Turkigu waxay qiyaasaan in ku dhawaad 3000 oo deeq waxbarasho la siiyay ardayda Soomaaliyeed. Dhanka caafimaadka, Turkigu wuxuu Muqdisho ka dhisay oo qalabeeyay laba isbitaal oo waaweyn oo uu ku jiro isbitaalkii ugu weynaa Soomaaliya oo leh miisaaniyad dhan $ 135.7 milyan.



Mugga ganacsi ee labada dal ayaa gaaray in ka badan $140 Milyan. Suuqyada Soomaaliya waxaa ka buuxa badeecado ay soo saaraan Turkida. Lix sano gudahood Turkiga ayaa noqday isha 5aad ee wax looga soo dhoofiyo Soomaaliya. Isku dheelitir la'aanta ganacsiga ee labada dal waa mid aad u weyn; intii u dhaxaysay 2007 iyo 2017 Turkiga celcelis ahaan wax soo Soomaaliya ka soo dhoofsadeen wuxuu ahaa US$1 milyan halka waxyaabaha Turkiga Soomaaliya u soo dhoofisay gaartay 143 milyan. Maalgashiga Turkiga ee Afrika kuma eka oo kaliya Soomaaliya. Tusaale ahaan, maalgashiga ganacsi ee Turkigu ka wado Itoobiya ayaa aad uga badan Soomaaliya.

6dii Maarso 2012kii ayay diyaaradda Turkish Airlines noqotay diyaaradii ugu horraysay ee caalami ah oo u duusha Muqdisho in ka badan 20 sano taas oo u suurta gelisay dadka Soomaaliyeed inay ku xirmaan dunida inteeda kale. Hadda marinka Istanbul-Muqdisho wuxuu noqday mid ka mid ah meelaha ugu faa'iidada badan Turkish Airlines ay ka hesho. Bishii Sebtembar 2013, shirkadda lagu magacaabo Favori LLC ee

Turkiga ayaa la wareegtay hawlihii gegida dayaaradaha ee Aden Cadde Muqdisho waxayna sannadkii 2014 $10 milyan ku dhistay Terminal cusub kaasoo suurtageliyey in duulimaadyadii ay labanlaabmaan. Favori ayaa dhowaan dhistay '4-star airport' huteel ooo durbadiiba noqday goob caan ku ah shirarka siyaasadeed. Sidoo kale, sanadkii 2014-kii, Soomaaliya waxay maamulka Dekedda Muqdisho u wareejisay shirkadda Al-Bayrak ee Turkiga oo la og yahay inay xiriir dhow la leedahay xisbiga talada haya ee AK Party ee madaxweyne Erdoğan. Hadda Dekedda Muqdisho waa isha ugu weyn ee dakhliga dowladda Soomaaliya – qiyaastii ah 80% dakhliga gudaha.

*Turkiga waa dalka kaliya ee si joogto ah u siiya Soomaaliya taageero miisaaniyadeed oo toos ah*

Tan iyo 2013kii, Turkiga waa dalka kaliya ee si joogto ah u siiya Soomaaliya kab miisaaniyadeed iyadoo toos loo soo marsinayo nidaamka maaliyadeed ee dalka. Taageerada miisaaniyadda tooska ah waxay gaartay US$117 milyan oo doolar lixdii sano ee la soo dhaafay. Intaas waxaa dheer in Turkigu gacan ka geystay dadaalada deyn-cafinta Soomaaliya isagoo ku yaboohay qiyaastii US$2.4 milyan. Bangiga dawladda Turkigu leedahay ee loo yaqaan *Ziraat Bankasi* ayaa ah bangiga keliya (correspondence bank ) ee Bangiga Dhexe ee Soomaaliya uu hadda u adeegsado macaamilkiisa caalamiga ah kaasoo sababtay in dhaqaalaha Soomaaliya uu ka xaroobo go'doonkii dhaqaale oo caalami ah ee uu ku jiray (global financial isolation).



Dhanka amniga, Turkiga ayaa Muqdisho ka dhisay xarunta milatari ee ugu weyn dibedda ku leeyahay iyadoo ay ku baxday lacag dhan US$50 milyan. Turkigu wuxuu kaloo tababaraa ciidanka Soomaaliya wuxuuna siiyaa hub iyo qalab militari.

Labada gole ee Baarlamaanka Soomaaliya ayaa waxaa hoy u ah oo ay ku shaqeeyan dhismayaal ay maalgelisay Turkigu waxayna 2013kii ballanqaaday Turkiga baarlamaanka Soomaaliya inuu baarlamaan u dhisi doono dhisme casri ah oo lagu qiyaasay inay ku baxayso $100 malyan.

Bishii Jannaayo 2020, dowladda Turkiga waxay iclaamisay inay Dowladda Soomaaliya ku casuuntay inay shidaal ka baarto badaha Soomaaliya. Ku lug lahaanshaheeda kaydka shidaalka ee xeebaha Soomaaliya ayaa laga yaabaa in ay Turkiga u horseedo inay wadamo kale daneeya shidaalka Soomaaliya ay arintan isaga hor imaadaan.

Dhanka bulshada, dhowrkii sanno ee la soo dhaafay, dalka Turkey wuxuu soo jiidatay siyaasiyiin, ganacsato iyo qurba-joogta Soomaaliyeed iyagoo ka faa'iidaysanaya helitaanka dhalashada Turkiga oo la fududeeyey sanadkii 2018. Turkiga isagoo ka jawaabaya guryo ka badan 1 milyan oo dad gata loo waayey ayuu wuxuu hoos u dhigay maalgashiga lagu helayo jinsiyadda Turkiga -

halkii markii hore ay ka ahayd US$ 1 milyan ayaa hoos loogu soo dhigay US$ 250,000. Hoos u dhaca ku yimid lacagta Liiraha Turkiga ayaa iyana ka dhigtay guryaha Turkiga kuwo aad u jaban. Qorshahan ayaa siyaasiyiin iyo ganacsato Soomaaliyeed aad u faro badan u noqotay waddo sahlan oo lagu heli karo baasaboorka Turkiga iyo degaaansho. Waxyaabaha kale ee soo jiitay qurbajoogta Soomaaliyeed ayaa ah cimilada, masaafadda dhow, cuntada, dhaqanka iyo labada dal oo waddamo Muslimiin ah. Hadda waxaa Turkiga ku nool jaaliyad Soomaaliyeed oo aad u ballaaran. Istanbul ayaa noqotay goobtii labaad ee heshiisyo siyaasadeed lagu gaaro marka laga reebo Nairobi. Joogitaanka Soomaalida tirada badan ee degtay Turkey ayaa waxaa astaan u ah in meel ka mid ah Istanbul ayaa loogu magac daray "Wadada Soomaaliya" oo ay muhaajiriinta Afrikaanka oo Soomaalida ku jirto ay ku nool yihiin halkaas.

*Turkiga waxaa loo arkaa in uu u xaglinayo magaalada Muqdisho kana gaabiyey Soomaaliya inteeda kale.*

Qaabka Turkey u wajaheyso Soomaaliya ee walaaltanimada iyo Islaamnimada ku dhisan waxaa si weyn ugu riyaaqay shacabka Soomaalida. Hase ahaatee, gargaarka Turkiga, deeqaha horumarineed, maalgashiga iyo taageerada siyaasadeed ayaanan si siman loogu qaybinin wadanka. Turkiga wuxuu si weyn u taakuleeyaa magaalada Muqdisho isagoo ka gaabiyey Soomaaliya inteeda kale.

Sannadkii 2015 Turkiga wuxuu ku yaboohay inuu 10,000 guri u dhisi doono qoysaska saboolka ah laakiin arinkaas ilaa hadda lama hirgelinin. Tusaale ahaan, Dowlad-goboleedka Koonfur-Galbeed oo xudun u ah dhibaatooyinka bani'aadamnimada ayna jiraan barakacayaal aad u badan ayaan weli arkin wax maalgelin/horumarin Turki ah oo muhiim ah.



Marka la eego isbeddelka siyaasadda Itoobiya ku aadan Soomaaliya Ra'iisul Wasaare Abiy Ahmed ayaa ballan qaaday inuu la shaqeynayo Soomaaliya Turkiguna waxay u arkeen fursad cusub oo ay iskaashi Itoobiya kala yeelan karaan arimaha Soomaaliya, waxay rumeysan yihiin in iskaashi lala yeesho Itoobiya uu siin karto awood waxtar leh iyagoo la ficiltanamay dalka Masar. Maadaama hadda Itoobiya oo ku jirta dagaal sokeeye iyo doorashada Soomaaliya oo hadda bilaabatay Turkiga wuxuu heystaa fursad uu qeyb lixaad leh kaga qaadan karo ismariwaaga siyaasadeed ee Soomaaliya.

Xiisadda Khaliijka ayaa iyana saamayn ku yeelatay siyaasada Turkiga ee Soomaaliya. Isbedelka hoggaanka Mareykanka ayaa hadda Turkiga siiyay fursad maadaama Sacuudiga iyo Imaaraadka ay lumiyeen taageeradii Mareykanka ka dib markii maamulka Donald Trump laga guuleystay. Maamulka cusub ee Mareykanka ayaa si dhaqso leh ugu dhaqaaqay inuu daweeyo khilaafka Khaliijka kaasoo Qatar oo ay Turkiga xulafo yihhin ka badbaadiyey cunaqabateyntii saarneyd. Turkiga iyo Qatar waxay ka siman yihiin taageeridda dhaqdhaqaaqyada

Islaamiyiinta siyaasadeed sida Ikhwaanul Muslimiinta. Labada dal ee Qatar iyo Turkiga ayaa la filayaa inay si wadajir ah u taageeraan hal musharax doorashada soo socota ee madaxtinimada Soomaaliya.

Maalgelinta siyaasadeed ee Qadar ee maamulka hadda jira ayaa si weyn loogu arkaa inay tahay mid xasilloonidarro dalka ku abuurtay halka Turkigu uu weli yahay saaxiibka istiraatiijiyadeed ee ugu waxtarka badan Soomaaliya. Waxaa xusid mudan in Turkigu uu si guul leh u farageliyay Suuriya, Liibiya iyo Azerbaijan haddana Turkigu wuxuu hadda u weeciyay dadaalkiisa Itoobiya meeshii laga rabay inuu arrimaha Soomaaliya ee cakiran gacan ka geysto.

Turkigu waa inuu dib-u-eegis ku sameeyaa istaraatiijiyadiisa Soomaaliya oo uu hubiyaa in maalgashiyada iyo gargaarka horumarineed si siman loogu qaybiyo dalka oo dhan. Turkigu waa inuu sidoo kale adeegsadaa awooddiisa si uu si firfircoon uga qaybqaato dadaallada dowlad dhisidda Soomaaliya. Hoggaanka siyaasadda Soomaaliya waa inay iyagana dhankooda u arkaan Turkiga inuu yahay saaxiib istiraatiiji ah oo dan u ah dalka iyo dadka.

## Contact Details

HornAfric Suite, National Theatre, Mogadishu, Somalia
Tel: +252 613 777 708
P.O Box 52743 Valley Arcade, Nairobi, Kenya Tel: +254 723 022 444
Email: info@aarancenter.org
Website: www.aarancenter.org